

## **Duruusta tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa.**

### **Qormadii 3aad.**

#### **Qalinkii Cabdirisaaq Caqli**

Deegaanka uu Sheikh Madar ku kacaamay waxay dekada ugu dhow, uguna weyni, ahayd Berbera xilligii uu qaangaadhay. Waxayna dekadaasi xidhiidh ganacsi la lahayd dalalka dibedda iyo deegaanada gudaha oo ay magaalada Harar ahayd ta ugu caansan. Waxaana caado ahayd in wiilasha ku wanaagsan diinta, ay waalidkoodu u diri jireen magaalada Harar oo ahayd xarunta ugu weyn ee muslimiinta geeska Afrika ku baran jireen aqoonta diinta.

Xilligii uu qaangaadhay Sheikh Madar oo ku beegan sannadkii 1841, waxaa aad u kordhay xidhiidhka ganacsi ee dekada Berbera la lahayd dalka Yaman gaar ahaan dekedda Cadan. Waxaana ganacsigaasi kordhay sababay markii Boqortooyadii Ingiriisku xoog ku qabsatay dekedda Cadan sannadkii 1839. Waxaa dekadaasi la dejiyay ciidamo badan oo Ingiriis ah. Waxayna ciidamadaasi u baahdeen hilib dibedda looga soo dhoofiyo. Somaliland, oo dhaqashada xooluhu aad ugu badnayd, ayaa noqotay meesha ugu dhow ee baahidooda buuxin karta. Dekedda Berbera, ayaa iyana noqotay dekada ugu haboon ee xoolahaasi laga soo dhoofin karo. Sidaasi awgeed ayuu aad u kordhay xidhiidhka ganacsi ee ka dhexeeyay labada dekadood ee Berbera iyo Cadan. Xoolo dhaqatadii ku dhaweyd magaalada Berbera waxaa u kordhay suuqa ganacsiga, iyo qiimaha xoolihii ay dhaqanayeen, gaar ahaan adhiga. Taasina waxay kordhisay awoodii dhaqaale ee xoolo dhaqatadii u dhowayd dekedda Berbera. Waxay fursadaasi soo korodhay aad ugu sahashay Axmed Shirwac, dhaqaale ahaan, inuu wiilkiisa Sheikh Madar u diro magaalada Harar oo iyana xidhiidh ganacsi la lahayd Berbera.

Waxay magaalada Berbera ahayd xilliyadii uu Sheikh Madar qaangaadhay dekad ay ka abuurantahay suuq xor ah oo ganacsiga ka socdaana yahay mid xor ah. Ma uu jirin wax xukuumad ah oo magaaladaasi ka talinayey oo suurtoogelin kara in badeecadaha soo gaadhaya dekadaasi laga ururiyo cashuur. Hase ahaatee beelaha ag degan ayaa kafaalo qaadi jiray in si nabad ah, oo xor ah ganacsiga laysku weydaarsado. Waxaana magaalada Berbera laga mamnuucay in dadka safarada la socdaa la soo dhex galaan magaalada wax hub ah. Taasina waxay dhalisay jawi nabadeed oo si nabadgelyo ah laysku weydaarsado badeecadaha la kala iibsano. Sidaasi awgeed ayay u abuurantay in doonyo aad u badani ku soo qulqulaan dekadani si ay badeecado uga iibiyaan ugan iibsadaa safarada faraha

badan ee dadweynaha kala duwan ee ay dekadani xidhiidhiso u soo doonantaan inay ka ganacsadaan. Bilaha u dhexeeya Oktoobar ilaa bisha March ayey cimilada iyo dabaylaha baddu suurtoogelinaysay in doonyuhu u soo safraan Berbera. Xiligaasi ayey ku soo beegi jireen safarada kala duwan ee ka iman jiray gudaha dalka ee ay Berberi dekada u ahayd oo idil. Waxaana magaalada Berbera ka abuurmi jiray ganacsi xooggan. Bilaha u dhexeeya April ilaa Oktoobar waxay magaaladu ahaan jirtay gabaahir aan cidid joogin, ganacsina aanu ka dhex socon.

Laba xidigle Cruttenden oo ahaa sarkaal Ingiriis ah, kana tirsanaa ciidamada badda ee dalka Indiya fadihay oo wax ka qoray sannadkii 1848 ganacsatada shisheeye ee ku soo qulqulaysay dekada Berbera wuxuu yidhi:

*“ Laga bilaabo bishii April ilaa bisha Oktoobar horraanteedii waxay ahayd meel gabaahir ah oon xataa qof keliya oo ka kaluumaysanayaa joogin. Laakiin, markii xilligii isbedelayba waxaa markiiba bilaabmay inay beelihii ku dhowaa u soo guuraan xagga xeebta iyagoo u sii diyaarinaya buulal ay ku degaan dadka ay filayaan inay iman doonaan. Doonyo yar oo ka yimid dekedaha Yaman oo ku soo degdegeya inay ka ganacsadaan ka hor intaanay doonyaha waaweyni soo gaadhin Berbera, ayaa ugu soo horreeya. Laba todobaad ka dibna waxaa soo gaadha doonyo kuwii hore ka waaweyn oo ka soo safray Masqat, Suur, Raas-al-khayma, iyo kuwo badeecad qaaliya wada kana yimid Baxrayn, Basra, iyo Graem. Ugu danbayn waxaa soo gaadha ganacsato baaniyaallo buurbuuran oo hanti badan wata, kana yimid porebunder, Mandavie, iyo Bombay oo gashan bajaamayaasha hindida ee balaqsan, tiyoo ay doonyahana ka hareero lushaan tanagyo madhan oo kuwa subagga lagu shuba ah. Waxayna ku soo xidhaan dekada. Waxayna xeelbadnaantooda, sumcadoo, iyo hantibadnaantoodu markiiba suuqa ka saartaa dadkii la tartamayey oo idil.”*

Laba xidigle Crutenden isagoo ka waramaya suuqa ganacsiga ee ka dhex socda Berbera wuxuu yidhi:

*“Awr safaf dhaadheer u xidhiidhsan ayaa habeen iyo maalinba soo gelaya ama ka baxaya magaalada. Badanaana haween keliya ayaa safaradaasi sii kaxeeya ilaa ay magaalada ka fogaanayaan.....Berbera gudaheeda ayey ganacsato ka kala timid Guraaga iyo Harar kula kulmaan ganacsatada kale ee ay wax kala iibsanaan ee ka timid Basra, Baqdaad, ama Bender Cabaas.....Marka uu suuqa ganacsigu gaadho heerka ugu sarreeya, Berberi kama dhacdo Baabel marka la eego afafka kala duwan ee laysla dhex jiidhayo.”*

Bal aynu dhinaca kale, yara lafagurno heerka uu gaadhsiisnaa xidhiidhkii ka dhexeeyay Harar iyo Berbera, si aynu u ogaanno sida xidhiidhkaasi ugu sahli karo Axmed Shirwac inuu wiilkiisa u diro magaalada Harar. Waxaa xidhiidhkaasi ganacsi ee ka dhexeeya Berbera iyo magaalada Harar sawir fiican innaga siin kara qoraal faahfaahsan oo uu ka bixiyay sahaniye Ingiriis ah Richard Burton, ( Shekh Cabdalle), oo socdaal ku yimid magaalada Harar sannadkii 1854, wuxuuna yidhi :

*“Saddex safar ayaa sannad kasta ka baxa magaalada Harar iyagoo u socda suuqa ganacsiga ee Berbera. Safarka ugu horreeya wuxuu dhaqaaqaa bilowga bisha January, tiyoo ay ku raranyihiin Bun Go’yaal, saliid macsaro, subag, xabag, garbasaarro, iyo buuri. Safarka labaad wuxuu dhaqaaqi jiray bisha February. Ka sadexaad oo aha safarka ugu muhimsan uguna ballaadhan ayaa gaadha Berbera maalmo ka hor intaan suuqa ganacsiga la gabagabayn. Dadka la socda safarkaasi ugu danbeeya waxay gaadhaan ilaa 3000 oo qof, oo uu hogaaminayo sarkaal ka mid ah saraakiisha ugu waaweyn ee Amiirka Harar. Waxaana jira hal hays aan xataa ku dhex maqlay magaalada Harar gudaheeda oo ah: “Ciddii kolba ka talisa Berbera ayaa gacanta ku haysa gadhka Harar.”*

Xidhiidhkaasi ganacsi ee ka dhexeeyay Berbera iyo Harar, wuxuu xoojiyay in dadka ku nool labada magaalo ay wax badan isweydaarsadaan, si fiicanna iskugu gudbaan, tiyoo uu jiro xidhiidh joogto ahi. Waxaana inoo muuqan kara in dad badan oo Soomaali ahi dhex degeen Harar iyagoo ka ganacsanaya ama diinta ka baranaya. Culimadii diinta ka baratay Harar qaar ka mid ah ayaa markii danbe macallimiin diinta dhigta noqotay. Waxaana macallimiintaasi ka mid ahaa Kabiir Khaliil oo ah Somali waxbarasho diineed uga socdaalay deegaanka Berbera ku dhow, si uu diinta uga soo korodhsado Harar. Kaasoo ka dib noqday macallimiinta ugu waaweyn ee diinta ka dhiga Harar. Richard Burton oo ka waramaya macallimiinta diinta ee Harar, markii uu socdaalka ku yimid sannadkii 1854, wuxuu yidhi: *“Culimada diinta ka dhiga Harar waxaa ugu sareeya Kabiir Khaliil, Kabiir Yonis iyo Sheekh Jaamac. Labada hore waabay yartahay inta ay guryahooga ka soo baxaan, waayo waxay waqtigooda oo idil ku dhameeyaan akhris iyo cilmi ay arday u dhigayaan”.*

Waxaa kale oo xidhiidhkaasi ganacsi abuuray in si joogto ah labada magaalo isku weydaarsadaan socdaalada, waraaqaha, iyo wararkaba. Markii uu Richard Burton ka soo anbabaxayey Harar ee uu ku soo socday Berbera wuxuu inoo sheegay: *“In ay galabtaasi ku soo urureen Soomaali badan oo naga soo buuxiyay waraaqo iyo fariimo ay u soo dirayaan Berbera”*

Wuxuu Sheikh Madar qaangaadhay tiyoo duruufka oo idili u sahlayso inuu aqoontiisa diineed ka sii korodhsado Harar, suurtoagalna ay tahay inuu ka dhex heli magaaladaasi arday iyo macalimiin Soomaali ah. Axmed Shirwacna waxaa u suurtoagalay inuu wiilkiisa u ambabixiyo Harar isagoo ku kalsoon in taakulayntiisa iyo la xidhiidhkiisuba yihiin arrin uu ku qabo kalsooni mudada uu wiilkiisu wax ka baranayo Harar. Sheikh Madar wuxuu u ambabaxay magaalada Harar si uu u sii korodhsado aqoontiisa diineed.

La soco salaasada danbe.

